



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA  
Ministry of Information Culture And Tourism

Date: 09/09/2020

## WAR SAXAAFADEED

“Muqdisho, 09-da September 2020, Galabta 5:40-daqiiqo waxaa meel maqaaxi ah oo ay shaah ku cabayeen kuna laydhsanayeen dad shacab ah oo dhalinyaro u badan isku qarxiyey Naf halige ay soo khaldeen kooxaha Argagixisada ah ee Alshabaab iyo Alqaacida.

Qaraxa inta ilaa hada la ogyahay waxaa ku dhintay 3 qof , halka 7 kalana ay ku dhaawacmeen.

Dowladda Soomaaliya waxa ay si adag u cambaarayneysaa weerarkaas naftii hilignimada ahaa. Dowladda Soomaaliya waxa ay tacsi tiraanyo leh u direysaa Ehelada dadkooda ku waayay Qaraxaas, waxayna Alle SW uga rajeynaysaa Caafimaad dag dag dadkii ku dhaawacmay.

Qaraxa oo uu fuliyay Qof naftii halige ah oo xirnaa jaakadda walxaha qarxa lagusoo xiray kaa soo bartilmaameedsaday dad shacab ah oo ku Shaahayay Maqaaxi lagu magacaabo Blue Sky oo ku taala Dagmada Boondheere ee Gobalka Banaadir.

Filcilkaan ayaa muujinaya sida ay u wiiqantay Awoodda kooxda Xagjirka Alshabaab, xilli aad loo adkeeyay Ammaanka magaalada Muqdisho, iyagoo markii laga hor istaagay gaadiidkii Qaraxyada billaabay in ay isticmaalaan dad lagu soo xiro walxaha qarxa iyo Miinooyin waddooyinka la dhigo.

Dowladda Soomaaliya waxaa ka go'an sii xoojinta dagaalka ka dhanka ah Kooxda Naflacaaridka ah ee Alshabaab.



## DHAMAAD